



UK Health
Security
Agency

NHS



Coronavirus (COVID-19)

Barnaamijka tallaalka ee loogu talagaley caruurta iyo da'yarta

Hagid loogu talagaley waalidiinta

Waa maxay sababta aan ilmaheyga u tallaalayo?

In kasta oo COVID-19 uu caadi ahaan inta badan dadka da'yarta ah ugu dhaco si fudud ama aan astaamo laheyn, waxay noqon kartaa mid ku xumaata qaar da'yarta ka mid ah. Qaadashooyin tallaalka ah ayaa siinaya ka ilaalin wanaagsan ee jirrada daran iyo isbitaal-dhigidda.

Tallaalida dadka jira 12 illaa 15 waa inuu sidoo kale gacan ka geystaa yaraynta baahida ay da'yartu u qabaan inay helaan fasax-dugsiyeed iyo inay yareeyaan halista faafitaanka COVID-19 ee dugsiyada dhexdooda ah.

Barnaamijka tallaalka COVID-19 ee dugsiyada sare waa inuu markaa siiyaa ilaalin dadka da'yarta ah, isla markaana yareeyaa carqaladaynta waxbarashada fool-ka-foolka ah. Arintani waxaa ay ka caawineysaa in ay dadka da'yarta ah niyad ahaan wanaagsan yihiin kana farxad badan yihiin, waxaya tani aheyd arina muhiim ah oo [uu ku xisaabtameyey](#) Saraakiisha Sare ee Caafimaadka.



Tallaalka Coronavirus (COVID-19)

Tallaalka COVID-19 waxaa uu caawimo ka yahayyareynta fursada caabuqa COVID-19, waxaana uu ilaalin wanaagsan ka bixiyaa jirada halista ah. Waxaa suurtagal ah in ay qaadato dhowr todobaad in uu jirkaagu ilaalin ka dhiso qaadashada hore ee tallaalka ka dib.

Badbaado ma u leeyahay dadka da'yarta ah?

Xakameeyaha daawooyinka, Wakaalada Xakamaynta Daawooyinka iyo Agabka Daryeelka Caafimaadka (MHRA), ayaa xaqiijiyay in tallaalka Pfizer uu yahay mid badbaado ah oo waxtar u leh 12 ilaa 17 sano jirka.

Arintani waxay daba socotey dib -u -eegis adag oo ku saabsan badbaadada, tayada iyo waxtarka tallaallada ee kooxdan da'da ah.

UK waxay sidoo kale ka faa'iideysatay inay xog ka hesho US, Canada iyo Israel, kuwaas oo horey ugu yaboohay tallaallo dhammaan dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 12 illaa 15 sano.

Fiidyowiyadan ayaa si faahfaasan u sharraxaya:

<https://twitter.com/DHSCgovuk/status/1434441175281274890>

<https://twitter.com/DHSCgovuk/status/1405246298320637960>

Sideey ku dhacdey in tallaalada sidan dhakhsaha leh loo soo saarey?

Dhammaan tallaalada waxaa ay soo mareen 3 marxaladood oo tijaabo caafimaad ah waxaana lagu tijaabiyey tobonaan kun oo dad ah oo dunida oo dhan ah. Marxaladaha tijaabada waa ay is garab socdeen, iyada oo la dedejinayo waqtiga guud ee uu qaadano soo saarista tallaalka, balse lama yareyn waqtiga muhiimka ah ee baaritaanka. Ilaa iyo Disembar 2020, tallaalka Pfizer waxaa la siiyey malaayiin dad ah oo jooga UK waxa uuna leeyahay diiwaan badbaado fiican.

Fiidyowiyadan ayaa si faahfaasan u sharraxaya:

<https://twitter.com/DHSCgovuk/status/1375364398601039872>

<https://twitter.com/DHSCgovuk/status/1421206463297441793>

Waxyeelooyinka badanaa garab socda

Sida daawooyinka oo dhan oo kale, tallaalada waxaa ay sababi karaan waxyeelooyin. Badanka waxyeelooyinkan waa kuwo fudud oo waqti-yarna jira, qof walbana kuma ay dhacaan. Waxyeelooyinka garab socda ee caadiga ah waana inay sii socdaan oo keliya maalin ama 2 maalmood.

Waxyeelooyinka garab socda ee badanaa dadka ku dhaca maalinta koowaad ama 2 waxaa ka mid ah:

- in aad gacanta ka dareentid xanuun badan, dareen cuslaansho iyo danqasho halka aad irbadda ka qaadatey
- dareemidda daal
- madax xanuun, xanuunyo iyo qarqaryo
- da'yarta waxaa sidoo kale ku dhici kara astaamo sida hargab-qandhoolaha oo leh dhacdooyin gariir ah iyo inaad gariirtid 2 maalmood

Waxaan ku talineynaa in ay da'yartu nastaan, qaataan paracetamol (iyaga oo raacaya talobixinta qaadashada ku taalla baakadda) si ay uga caawiso in ay caafimaadaan.

Waxyeelooyinka garab socda ee daran oo naadir

Dhammaan dunida, waxaa jirey xaalado dhowaan la arkey, aad naadir u ah oo bararka wadnaha ah, loona yaqaano myocarditis ama pericarditis oo laga soo sheegey ka dib qaadashada tallaalada COVID-19. Badanka dadkani waa ay biskoodeen, wayna ladnaadeen ka dib nasasho iyo daaweyn fudud.

Kiisaskaan waxaa inta badan lagu arkay ragga da'da yar, waxayna inta badan dhaceen dhowr maalmood gudahood markii la qaatay qaadashada labaad; myocarditis waa mid aad naadir u ah ka dib qaadashada hore ee tallaalka.

Ilmaheyga miyaa lala socon doonaa tallaalka ka dib?

Ka-falcelinta xassaasiyadda daran ee tallaalka ah ayaa aad u yar laakiin waxay dhacaan dhawr daqiiqo gudahood ka dib duritaanka. Kooxaha adeegga tallaalka ee caruurta dugsiyada ayaa dhammaantood waxaa loo tababaray inay gartaan, oo maareeyaan falcelinada xassaasiyadda, sidaas darteed dhammaan carruurta leh xassaasiyadaha waa lala socon doonaa ilaa iyo 15 daqiiqo.

Kooxaha bixiyayaasha adeegga tallaalka ee caruurta dugsiyada waxaa ay wadan doonaan qalabka looga baahan yahay in ay daaweeyaan xassaasiyadaha. Caruurta qabta xassaasiyadaha cunnada caadiga ah kuma ay sugna halis ka sareysa xassaasiyadahan halista ah.

Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka COVID-19?

Waraaqaha [NHS-ta](#) ayaa bixinaya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka oo loogu talagaley waalidiinta iyo dadka da'yarta ah, oo ay ku jiraan sida ay u shaqeyso iyo waxa la fili karo ka dib tallaalka COVID-19.

Waxaa jira noocyo la heli karo oo ah foomka oggolaanshaha iyo waraaqo yaryar oo loo heli karo kuwa qaba naafonimo waxbarasho ama la nool autism. Waxaan haynaa fiidiyowyo loogu talagaley indhoolayaasha iyo BSL oo la dalban karo ama la soo dejisan karo. Turjumaado ayaa sidoo kale la heli karaa.



Sidee tallaalka lagu bixiyo dugsiya u shaqeyaa

Sida dhammaan barnaamijyada tallaalka ee ku saleysan dugsiya, tallaalkada waxaa maamuli doona bixiyaha adeegga tallaalka ee caruurta dugsiya, oo si dhow ula shaqeynaya dugsiya.

Xaq u lahaanshaha iyo waqtiga tallaalka

Yaa qaadan kara tallaalka goorama ayeyna qaadanayaan?

Kuwa da'doodu tahay 12 ilaa 17 sano jir ee halista ka sii badan ugu sugan caabuqa ama la nool qof nidaamkiisa difaaca jidhku daciif yahay ayaa sidoo kale loo yaboohay 2 qaadasho oo tallaalka ah oo 8 todobaad isu jira.

Dhammaan da'yarta jirta 12 ilaa 15 sano ayaa hadda loo yaboohayaa qaadashada 2 ee tallaalka oo 12 todobaad u kala dhexayso. Tallaalka waxaa lagu bixin doonaa barnaamijyada dugsiyada iyo goobo tallaalka qaarkood.

Maxaa dhacaya haddii ilmaheyga laga helo COVID-19?

Ilmahaagu waa in uusan tagin aadis/ballan xarun tallaalka ama dugsiya ama xarun haddii laga heley COVID-19. Waa in ay is-go'doomiyaan sugaana muddo 12 todobaad ah ka hor inta aysan qaadan qaadashadooda koowaad ama labaad. Ilmaha ku sugan halista badan, waa in ay sugaan 4 todobaad ka dib marka laga heley, ka hor inta aysan qaadan tallaalka.

Maxaa dhacaya haddii uusan ilmaheygu helin tallaalka maalinta dugsiya lagu bixinayo?

Dhallinyaro kasta oo da'doodu u dhaxayso 12 illaa 15 sano oo aan qaadan tallaalkooda maalinta tallaalka, waxaa jiri doona qaban-qaabino ka dabageyn ah oo uu dejiyey bixiyaha adeegga tallaalka caruurta dugsiya oo uu awoodi doono inuu la wadaago dugsiya. Arintan waxaa ku jira qof kasta oo dhallinyaro ah oo gaadhay 12 sano ka dib maalinta bixiyaha adeegga tallaalka ee da'da dugsiya uu booqdo dugsiya.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu qabo xaalad caafimaad ama uu xanuunsan yahay maalinta bixinta tallaalka?

Haddii qof da'yar ah uusan caafimaad qabin maalinta, bixiyaha adeegga tallaalka ee caruurta dugsiga ayaa go'aamin doona in la sii wado tallaalka iyo in kale.

Yabooh ka-dabageyn ah ayaa loo samayn doonaa carruur kasta oo seega tallaalka koowaad ee dugsigooda. Arintan waxay ka caawineysaa in ay hubiso caruurta soo socota in ay helaan tallaalka:

- haddii ilmahaagu uu noqdo da'da 12 sano ka dib maalinta qaadashada
- haddii uu ilmahaagu ka maqan yahay dugsiga maainta qaadashada
- haddii ilmahaagu uu mar dhow qaadey caabuqa COVID-19
- haddii aad go'aankaagii qaadashada tallaalka bedeshey ama aad u baahan tahay waqti yar oo dheeraad ah si aad go'aanka u gaarto

Dhammaan su'aalaha ku saabsan habboonaanta tallaalka ee shakhsiyaadka da'yarta ah waa in lagu hagaajiyaa bixiyaha adeegga tallaalka caruurta dugsiga ee bixiya tallaallada, kuwaas oo sidoo kale awood u yeelan doona inay wadaagaan macluumaadka ku saabsan waqtiyada ka-dabageynta ah.

Ilmahayga waxaa wax lagu baraa guriga mana tago dugsiga, ma la siin doonaa tallaalka qayb ka ah barnaamijkan?

Dhammaan dadka da'yarta ah ee xaqa u leh ee aan dugsiga dhigan, tusaale ahaan kuwa guriga wax lagu baro ama deggan hooy ammaan ah, waa in la siiyaa tallaalka. Bixiyaha adeegga tallaalka caruurta dugsiga ayaa lahaan doona qorshayaal uu ku siinayo tallaaladan da'yartaas.

Ilmahaygu waxaa uu ka weyn yahay 12 sano jir balse wuxuu ku jiraa waxbarashada horeysa ee kulliyadaa, dugsina aheyn, ma la siin doonaa tallaalka qayb ka ah barnaamijkan?

Haa. Dhammaan caruurta xaqa u leh ee da'da dugsiga ah ee aan dugsiga dhigan waa in la siiyaa tallaalka. Bixiyaha adeegga tallaalka caruurta dugsiga ayaa lahaan doona qorshayaal uu ku siinayo tallaaladan caruurtaad.

Ilmahaygu waxaa uu dhigtaa dugsiga gaar ah, ma la siin doonaa tallaalka qayb ka ah barnaamijkan?

Haa. Bixiyaha adeegga tallaalka caruurta dugsiga waxaa la siiyey waajibaadka in ay tallaalaan caruurta dhigata dugsiyada gaarka ah.

Ilme 12 ilaa 15 jir ah ma isticmaali karaa goobta COVID-19 ee la iska tago haddii ay taasi ka dhakhso badnaan lahayd?

Haa, kooxdan waxaa ay adeegsan karaan National Booking Service (Adeegga Is-qoridda ee Qaranka) ama wici karaan 119, waxaa kale oo ay tegi karaan xarumaha ballan la'aan la iska tago.



Sidee buu u shaqeeyaa habka oggolaanshuhu?

Dhammaan waalidiinta, ama kuwa leh mas'uuliyadda waalidnimo, waxaa la weydiistaa oggolaansho, waxayna sida caadiga ah go'aankan si wadajir ah ula gaari doonaan carruurtooda. Warqadda macluumaadka waxaa lagu hagaajinayaa ilmaha (sida qaataha tallaalka oo kale), waxayna ku dhiiri-gelinaysaa inay waalidkooda kala hadlaan go'aanka ku saabsan tallaalka.

Dugsiyada sare, da'yarta qaarkood ayaa laga yaabaa inay leeyihiin biseyl ku filan inay bixiyaan oggolaanshahooda. Arintani mar-marka qaarkood waxay dhacdaa haddii waalidku uusan soo celin foomka oggolaanshaha laakiin ilmuhu uu weli doonayo inuu qaato tallaalka maalinta qaadashada. Dadaal kasta ayaa la samayn doonaa si loola xiriiro waalidka si loo raadsado oggolaansho afka ah

Arintani waa howlqabad si fiican u dhisan oo aad ku arki doontid barnaamijyada tallaalka ee ku saleysan dugsiyada.

Yaa go'aaminaya in qof da'yar uu bixin karo oggolaanshiisa?

Dugsiyada sare, da'yarta qaarkood ayaa leh biseyl ku filan inay bixiyaan oggolaanshahooda. Xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee kooxda tallaalka dugsiyada ayaa la hadli doona qofka da'yarta ah, waxayna ku dadaali doonaan inay la xiriiraan waalidka. Xirfadlayaashan ayaa khibrad u leh tallaalka da'yarta waxayna mas'uul ka noqon doonaan qiimeynta haddii ay leeyihiin faham ku filan in ay oggolaanshahooda bixiyaan (arintan waxaa loo yaqaan 'Gillick competence').

Arintani waa howlqabad si fiican u dhisan oo aad ku arki doontid barnaamijyada tallaalka ee ku saleysan dugsiyada.

Waxaad ka akhrisan kartaa buugga Cagaaran ee tallaalka (Green book of immunisation) macluumaad dheeri ah oo ku saabsan oggolaanshaha oo ay ku jirto Gillick competence – www.gov.uk/government/publications/consent-the-green-book-chapter-2 .

Waalidiintu ma diidi karaan in ilmahooda la tallaalo?

Haa. Tallaalku khasab ma aha. Waalidiinta waxaa la weydiin doonaa in ay bixiyaan oggolaanshahooda tallaalka Dhallinyaradu waxay muujin karaan rabitaankooda ah inay qaataan tallaalka, waxayna yeelan karaan garaad ay ku bixiyaan oggolaansho la xog ku dhisan. Waalidiinta waa in lagu dhiiri galiyaa inay la hadlaan carruurtooda waqti hore si markaas loo helo heshiis oggolaansho ka hor kulanka tallaalka.

Haddii oggolaansho la waayo, oo qofka dhallinyarada ahi aanu laheyn Gillick competence ama aanu doonayn in la tallaalo, tallaalku lama siin doono.

Maxaa dhacaya haddii waalidku uusan oggolaan, laakiin qofka da'yarta ahi uu rabo in la tallaalo?

Dhallinyarada si buuxda u fahmay waxa ku lug leh habraaca la soo jeediyay, sida tallaalka, waxay sharci ahaan bixin karaan oggolaansho. Arintan waxaa loo yaqaanaa 'Gillick competence'.

Haddii aan wax oggolaansho ah laga helin waalidka, laakiin qofka da'yarta ahi uu rabo in la tallaalo oo uu ku qiimeeyo xirfadlaha daryeelka caafimaadka in uu leeyahay Gillick competence, qofka da'yarta ah weli waa la tallaali karaa.

Xaaladdan oo kale, adeeg-bixiyaha adeegga tallaalka da'da dugsiyada ayaa samayn doona dadaal kasta si uu ula xiriiro waalidka, si uu isugu dayo oo ay heshiis u gaadhaan waalidka iyo qofka da'yarta ah. Si kastaba ha ahaatee, waalidku ma burin karo go'aanka qof da'yar ah oo leh Gillick competence.

Waxaad ka akhrisan kartaa buugga Cagaaran ee tallaalka macluumaad dheeri ah oo ku saabsan oggolaanshaha oo ay ku jirto Gillick competence – www.gov.uk/government/publications/consent-the-green-book-chapter-2 .

Su'aalaha badanaa la is weydiyo

Ilmahaygu wuxuu leeyahay xassaasiyado, ma qaadan karaa tallaalka?

Waxaa jira carruur aad u yar oo aan qaadan karin tallaalka.

Tallaalka ka hor dhammaan shakhsiyaadka waxaa la siiyaa waraaq ka hadlaysa macluumaadka badbaadada ee ku saabsan tallaalka. Arintan waxaa ku jiri doona isku xirka macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xaalado caafimaad oo kasta oo laga yaabo inay ka horjoogsadaan qofka da'da yar inuu qaato tallaalka. Waxaad halkan ka akhrinta kartaa macluumaadka loogu talagaley kuwa UK ku qaatey tallaalka Pfizer:

<https://coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk/productinformation>

Dhammaan dhalinyarada iyo waaldiintooda ama daryeelayaashooda waa inay la tashadaan dhakhtarkooda haddii ay qabaan walaacyo la xiriira xassaasiyadaha iyo tallaalka COVID-19.

Waxaan maqlay in tallaalladu sababi karaan dhiiga caadada aan joogto ahayn ama dhiig-baxaan la filayn?

Dhibaatooyinka dhiiga caadada waa kuwo aad u badan waxaana sababi kara arrimo kala duwan oo ay ka mid yihiin walaaca iyo jirrooyinka kale ee muddada gaaban. In kasta oo dadka qaar ay soo sheegeen in dhiiga caadooyinkooda muddo kooban la carqaladeeyay bishii tallaalka ka dib, haddana ma jirto wax caddaynaya in arintani uu tallaalku sabab u ahaa.

Tallaalka ma saameyn karaa ubad dhalidda?

Ma jiraan wax caddayn ah in tallaallada COVID-19 ay saameeyaan bacriminta ragga ama dheddigga. Waxaa jira macluumaad [faa'iido leh](#) oo ku yaala bogga internet-ka ee British Fertility Society.

Tallaalada khamro ma ku jirtaa?

Khamri kuma jiro tallaallada COVID-19 ee Pfizer oo ah tallaalka lagul taliyey in ay da'yartu qaataan.

Tallaallada COVID-19 ma ku jiraan wax laga sameeyey xayawaan?

MHRA ayaa xaqiijisay in tallaalada aysan ku jirin wax ka yimid xayawaan. Dhammaan maaddooyinka waxaa lagu daabacay macluumaadka daryeelka caafimaadka ee bogga internet-ka MHRA.

Fiidiyowga ayaa bixinaya macluumaad dheeraad ah:

<https://twitter.com/DHSCgovuk/status/1387368497517236234>

Tallaalku miyuu ku habboon yahay da'yarta cuna khudaarta cagaaran oo keliya/khudaarleyda ah, Muslim ama Yuhuud ah?

Tallaalka Pfizer kuma jiro wax hilib laga sameeyey, xoolaha ama ukun laga sameeyey.

The British Islamic Medical Association ayaa soo saaray hage waxtar leh, kaas oo laga heli karo <https://britishima.org/operation-vaccination/hub/>.

Tallaalada ma ku jirtaa COVID-19?

Maya. tallaalka kuma ay jiraan fayras nool.



Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan tallaalka, fadlan la hadal bixiyaha adeegga tallaalka ee caruurta da'da dugsiga. Waxaad ka heli doontaa faahfaahinta xiriirkooda foomka macluumaadka iyo ogolaanshaha.

Haddii aad dareento culeys ama diiqad kugu abuurto go'aanka ama COVID-19, fadlan taageero ka hel www.nhs.uk/mental-health/nhs-voluntary-charity-services/charity-and-voluntary-services/get-help-from-mental-health-helplines .

Macluumaad dheeri ah oo loogu talagalay waalidiinta iyo carruurta si ay uga wada hadlaan tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay 12 illaa 15 sano jirka, oo ay ku jiraan sida uu u shaqeeyo iyo waxa la filayo tallaalka COVID-19 ka dib, ayaa laga heli karaa xiriirka soo socda: [COVID-19 vaccination: resources for children and young people – GOV.UK \(www.gov.uk\)](https://www.gov.uk/government/collections/covid-19-vaccination-resources-for-children-and-young-people).





Vaccination, helping to protect those most vulnerable.

© Crown copyright 2021. Version 3 DEC 2021. 1p 350K NOV 2021 (APS).

UK Health Security Agency Gateway number: 20211092. Product code COV2021PFSSO Somali.

This leaflet is also available in Albanian, Arabic, Bengali, Bulgarian, Chinese, Estonian, Greek, Gujarati, Hindi, Panjabi, Latvian, Lithuanian, Polish, Portuguese Brazilian, Romany, Romanian, Russian, Somali, Spanish, Turkish, Twi, Ukrainian and Urdu paper copies.

To order more copies of this leaflet visit www.healthpublications.gov.uk or phone: 0300 123 1002 (8am to 6pm, Monday to Friday).